FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 13-aad. Garowe December 14, 2011** **Lam.12**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

*Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**
**Sharciga Gudniinka Gabdhaha**

**Qaybta labaad**
**Xeer**
**Waxba ma leh**
**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**
**Waxba ma leh**

***Sharci Lr 12. ee 13/12/2011, kuna saabsan Xeerka Gudniinka Gabdhaha.***

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr.12 ee December 13, 2011, kuna saabsan Xeerka Gudniinka Gabdhaha.**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/132/2011 ee 10/12/2011;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen xeerka Gudniinka Gabdhaha

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa xeerkani sharci noqonayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

**Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

164

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOMALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**
**HOUSE OF REPRESENTATIVES**
**Office of the Speaker**

---

**Ref:- XGGW/DPL / 132 /2011** **Garoowe, Sabti** **Date:- 10/12/2011**

**Ku: Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo: Dib u celin Diidmada Madaxweynaha**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 64-aad ee Dastuurka DPL** |
| **MARKUU ARKAY:** | **Dib u soo celinta Madaxweynaha ee Xeerka Gudniinka Puntland.** |
| **MARKUU ARKAY:** | **Qodobka 9-aad ee Dastuurka DPL.** |
| **MARKUU LA TASHADAY:** | **Culumaa'u Diinka waaweyn ee Puntland, ayna sugeen in uu Gudniinka Gabdhuhu sunne yahay.** |
| **MARKUU TIXGELIYEY:** | **Xeerkii Gudniinka ee Goluhu hore u ansixiyey.** |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:**

**Inaysan Diidamda Madaxweynuhu waafiqin Shareecada Islaamka iyo Dastuurka DPL.**

**Allaa Mahad Leh**

**Cabdirashiid Maxamed Xirsi**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

# XEERKA GUDNIINKA

## Hordhac

Xeerka Gudniinka gabdhaha iyo wiilasha waxaa saldhig u ah shareecada islaamka iyo Dastuurka DPL.

## Qodobka 1-aad

## Gudniinka Wiilasha

1.1 Gudniinka Wiilashu waa waajib la fulinayo inta aanu wiilku qaan-gaarin

1.2 Waxaa laga jarayaa haraga buuryada ama balagta ee ku dahaaran xubinta dareenka ee wiilasha.

## Qodobka 2-aad

## Gudniinka Gabdhaha

2.1 Gudniinku gabdhuhu waa Sunne loo baahan yahay in la fuliyo inta aanay gabadhu qaan-gaarin

2.2 Waxaa gabadha laga jarayaa haraga kintirka kor saaran iyadoo aan carjowda wax la yeelayn kor iyo hoos midnaba.

2.3 Waxaa reebban waxyeelaynta xubnaha kale ee taranka sida:- googoynta, xoqidda iyo tolista.

## Qodobka 3-aad

## Dadka loo ogol yahay in ay wax gudaan

Gudniin waxaa samayn kara qof haysta ruqsad gudniin oo ay bixisay Wasaaradda Caafimaadku.

## Qodobka 4-aad

## Dadka aan la Gudayn

4.1 Qof kasta oo ku dhasha isagoo aan lahayn xubintii la jari lahaa (buuryada ama balagta).

4.2 Qof kasta oo aan awoodi Karin gudniinka tabar darro awgeed.

4.3 Qof kasta oo aan dhiigiisu lahayn xinjirow cabsina laga qabo in uu dhiig bax u dhinto.

## Qodobka 5-aad
## Mamnuucid

Dhammaan degaannada Puntland waxaa laga mamnuucay gudniin kasta oo aan waafaqsanayn qodobada 1-aad iyo 2-aad ee xeerkan.

## Qodobka 6-aad
## Ku xad gudubka Gudniinka

6.1 Qof kasta oo ku xad gudba gudniinka xeerkani tilmaamayo waxaa lagu yeelanayaa magdhow u dhigma dhibaatada uu geystay.

6.2 Wuxuu mutaysanayaa ciqaab u dhiganta fal-dembiyeedka uu galay waxaana Go'aan ka gaaraysa Maxkamada awoodda u leh.

## Qodobka 7-aad
## Waalidiinta

Waalidiinta guda ubadkooda ama bixiya amarka gudniinka ayna ka dhalato waxyeello wax ciqaab ah laguma yeelanayo sida ay shareecada islaamku qabto.

## Qodobka 8-aad
## Ku dhaqan Xeer

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan dadka ku nool deegaannada Puntland.

## Qodobka 9-aad
## Dhaqan gal

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa markii Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha DPL saxiiixo lagu soo saaro faafinta rasmiga ah.

**Dr, Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**